
# Puntland maxaa u diiday in ay hanato in ka badan €70, 000,000 (toddobaatan malyan oo Yuuro) sanadkiiba?

cusmaancumar@gmail.com

| Puntland | Mawritaniya |
|---|---|
| • Dhererka xeebta Puntland = 1600 KM | • Dhererka xeebta Mawritaniya = 754 KM |
| • Dakhliga kasoo gala dawladda heshiisyada kalluumeysiga = lama yaqaan. | • Dakhliga kasoo gala dawladda Mawritaniya heshiisyada kalluumeysiga sanadkiiba 90,000,000 (90 malyan) oo dollar. |
| • Dawladaha ka kalluumeysta Puntland = Qolo walba oo fursad u hesha | • Dawladaha ka kalluumeysta = Midowga Yurub, Ruushka,iyo Shiinaha |
| • Tirada dadka Puntland = 2,400,000 | • Tirada dadka Mawritaniya = 3,700,000 |
| • Misaaniyadda (2014) ee Puntland = 30 Malyan oo dollar | • Misaaniyadda (2014) ee Mawritaniya = 8,000 Malyan oo dollar. |

Mawritaniya waa dal ku yaal galbeedka Afrika. Dhereka xeebtiisu waa 754 KM oo saaran badda Atlantiga. Waddankani waxaa u soo xeroonayey sanad walba lacag dhan 70 malyan oo Yuuro oo u dhiganta 90 malyan oo dollar. Dakhligaa waa heshiis kalluumeysi oo dhex maray waddankan iyo Midowga Yurub (EU) – Oggolaasho in Midowga Yurub ka kalluumeystaan xeebta Mawritaniya xilli go’an sanad walba.




Waxaana waajib ku ah Midowga Yurub in ay ka jillaabtaan badda Mawriyaniya si aan keeneeyn jarriif iyo nabaad guur ku dhaca kheyraadka baddaasi. Waxaa kaloo waajib ku ah Midowga Yurub in ay tababbaraan oo ay shaqaaleeyaan bulshada deggan deegaanka xeebtaasi – waa tababbar iyo shaqaaleyn la xiriirta kalluumeysiga iyo shaqooyinka badda.

Haddaba maxaa diiday in Puntland dariiqaasi ay qaaddo? Maxaa diiday in Puntland heshiis noocaas oo kale ah laggasho dawladaha daneynaya kheyraadka qotoma xeebta dheer ee

Puntland? Xeebtaasoo dhererkeedu yahay 1600 KM, laga soo bilaabo Gacanka Cadmeed (Gulf of Aden) oo badda Cas ah ilaa deegaanka Garacad oo ku yaal Badweynta Hindiya. **(Khariiddada)**

## Xeebtaa dheer yaa ku hawlan hadda?

Ciidamo huwan ah oo ay ka mid yihiin NATO, Ruushka, Shiinaha, Hindiya, Iiraan, Imaaraadka, iyo kuwa kale ayaa ku hawlan si ay u 'joojiyaan' waxa ay ku tilmaameen aafada burcad badeedda.

Waa dhab in burcad badeeddu tahay aafo. Balse aafada kale waa kuwa jarriifaya xeebtaasi iyo kuwa ku daadinaya qashinka iyo suntan. Cirrib tirkooduna waa muhim.

Waxaa kaloo ku hawlan xeebtani maraakiib iyo doonyo ka jallaabanaya oo ay dullaal ka yihiin niman burcad reer Puntland ah oo wata shaati qabiil/deegaan. Waxa ay ka dullaalaan ayaa ah xoogaa jeebkooda ku filan marka loo eego dakhliga kasoo geli lahaa dawladda. Ogoow miisaaniyadda sanadkan (2014) ee Puntland waa 30 malyan oo dollar. Waddanka Mawritaniya oo xeebtiisu ka yartahay tan Puntland 846 KM ayaa usoo xerootay 90 malyan oo dollar sanadkiiba.

Warbixin ay soo saartay heyadda *Global Policy Forum* (2011) oo la shaqeysa Qaramada Midoobay (UN) ayaa lagu sheegay in maraakiib iyo doonyo tiro badan oo ka soo hayaamay Yurub iyo Asiya ay kusoo xoomaan sanad walba xeebtaa dheer ee Somaliya ayagoo biliqeysanaya kheyradkaasi oo lagu qiyaasay 200,000 tan oo kalluun ah oo udhiganta 300 malyan oo dollar. Waxaa intaasi dheer xaalufin iyo qashin qub.

Hantida iyo kheyraadka intaa la eg ayaa waxaa ka qatan dhammaan degmooyinka iyo tuulooyinka ku yaal Badda Cas iyo badweynta Hindiya ee xeebaha Puntland. Caafimaad darrada, waxbarasha la'aanta, hooy xumada, waddooyin la'aanta, iyo shaqa la'aanta ka jirta deegaannadaasi waxaa lagu xallin kari lahaa haddii si daacad ah oo hufan loo maareeryo kheyraadka xeebaha Puntland. Waa waajib saaran dhammaan xildhibaannada iyo wasiirada Puntland in ay dib isugu noqdaan oo ay xal u helaan shiddada ka taagan xeebaha Puntland iyo dandarrada heeysata shacabka ku nool deexda.

## Maxaa la gudboon Puntland, gaar ahaan wasaaradda Kalluumeysiga?

Waxaa habboon in mudnaan gaar ah la siiyo sidii loo joojin lahaa dullaallada keenaya maraakiibta iyo doonyaha sida sharci darrada uga jallaabto xeebaha Puntland.

Waxaa kaloo muhim ah in wasaaradda kalluumeysiga ay soo bandhigto dhammaan heshiisyada kalluumeysi oo lala gelayo maraakiibt iyo doonyaha u imanay kalluumeysiga, sida xilliga, kharashka lagula heshiiyo iyo daryeelka ama horumarin loo sameynayo deeganka laga kalluumeysanayo.

In la keenaa shariikado ku xeeldheer sharciyada kalluumeysiga oo goobjoog ka noqday heshiisyada lala gelayo kuwa doonaya in ay ka kalluumeeystaan Puntland.

In la abuuro mac-had lagu barto aqoonta kalluunka iyo jallaabashada ilaa heer diblooma.

In la kobciyo dhammaan iskaashatooyinka kalluumeysiga eeka jira Puntland heerkooda aqoon iyo maareeyn.

In la baahiyo waxtarka caafiimaad ee uu leeyahay cunista kalluunka si suuq waxtar leh looga helo Puntland dhexdeeda.

Waxa maanta ragaasiyey dhaqaalaha Puntland waa maareeyn liidata iyo musuq qota dheer. Waxaa hubaal ah haddii si hufan looga faa-iideysto oo loo maalo kheyraadka badda Puntland in dhaqaalaha iyo nolosha bulshada reer Puntland is beddel muuqda ku iman karo.